

## Habraaca Diyaarinta Milanka Biliijka Warankiilada

### Qalabka Loo Baahan Yahay:

- Difaaca Indhaha
- Gacmo Gashiyo
- Marada Qeybta Hore Lagu Xirto
- Qaadooyinka iyo koobabka wax lagu cabiro
- Dubaalad
- Weel cabbirkiisu yahay gallon
- Goob hawo fiican leh!
- Material Safety Data Sheet (MSDS, Xaashida Xogta Badbaadada Qalabka) si aad uga hesho xogta badbaadada

1. Dhalooyinka kusoo gur baaldiyo gaar ah: mid loogu talagalay **daawada Jeermiska disha: Dheecanada Jirka, Musqulaha iyo xafaayadda** iyo mid loogu talagalay **Nadiifinta jeermiska: milanka cuntada dusheeda, jikada, fasalka**. (Dhalooyinka **Jeermis dilaha** iyo **Nadiifiyayaasha Jeermiska** waa inaysan istaaban si looga fogaado inay isasumeeyaan.)
2. Faaruji dhammaan dhalooyinka lagu buufiyo fasalka, Dhaq, biyo raaci oo **Jeermiska kadil** dhalooyinka buufinta dushooda. Haddii ay aad ugu habboon tahay, dhalooyinka waxaa lagu dhaqi karaa oo jeermiska looga nadiifin karaa mashiinka ootomaatiga udhaqa.
3. Waaxda Labor and Industries (Shaqada iyo Warshadaha) ayaa waajibisa in shaqaalaha ay xirtaan qalabka ilaalinta ee lagu taliyey. Warankiilada dhinaceeda waxaa kamid ah ookiyaalayaasha indhaha, gacmo gashiyada, iyo maryaha qeybta hore lagu xirto. Dadka qaba xanuunada caafimaad ee neefsashada ama wadnaha waa inaysan diyaarin warankiilada.
4. Goobta la doorbidaayo in lagu diyaariyo daawada **Jeermiska disha** iyo daawada **Nadiifisa jeermiska** waa qolka dhaqitaanka/adeegga ee biyuhu hoos kasii baxaan. Haddii aan mid laheli karin, milanka daawada waxaa lagu diyaarin karaa musqusha ama jikada. Xaqiiji in goobta warankiilada lagu diyaarinayo ay hawo fiican leedahay.
5. U tixraac jaantuuska “Habka la isugu Qaso Warankiilada” ee cabirada kuhabboon ee loogu talagalay iskuqaska warankiilada ee laga isticmaalo goobtaada.
6. Isticmaal qalabka cabbirka ee kuhabboon si aad biliijka warankiilada ugu cabbirto weel cabbirkiisu yahay gallon. Weelka gallon-ka ku buuxi dhalooyinka buufinta fasalka.
7. Taariikhda kuqor dhalooyinka buufinta fasalka. Xaqiiji in dhalooyinka buufinta lagu calaameeyo magaca fasalka si markaa loogu celiyo fasalkii laga keenay markii hore.
8. Haddii milanka warankiilada lagu qaso jikada, miiska, saxanka tuubada biyaha hoos kabaxaan, ama meel dusheeda oo ay taabtaan dhalooyinka buufinta waa in **Jeermiska laga dilaa** iyadoo la raacaayo habka nadiifinta 3-da tallaabo ah kadib marka milanka daawada la diyaariyo.
9. Si badbaado ah ugu keydi isku qaska warankiilada meel aysan ilmuhu gaari karin, oo ka dheer cuntada iyo kiimikooyinka aysan isqaadaneynin (sida amooniyada).